# MACLUUMAADKA LA QORAY

Waa inaad akhrisaa macluumaadka soo socda ka hor intaadan saxiixin caddeynta.

## Fursadahaaga aad ku maareynaysid Deynta aan la maameyn karin

**La hadal deyn bixiyahaaga:** deynbixiyayaasha qaarkood waxay ku siinayaan wakhti badan oo aad ku bixiso, waxay ogol yihiin in dib looga wada hadlo dib u bixinta ama aqbala lacag bixin ka yar si aad deynt u bixiso.Deyn bixiyaha qaarkood waxay leeyihiin bixinta dhaqaala xumida oo aad u isticmaali kartid bedelida shuruudaha heshiiskaaga.Waa inaad wacdaa deyn bixiyahaaga oo aad weydiisaa waxay bixinayaan dhaqaale xumida.

**Xaree rabitaanka inaad caddeyn soo gudbiso codsiga deynsanaha**: tani waxay joojineysaa deyn bixiyahaaga,sarkaalka ama shriff kai nay talaabo qaadaan ay ku soo ceshadaan deynta aan dammaanada lahayn xili ah 21 maalmood. Waxaad u isticmaali kartaa wakhtigaas inaad la hadasho deyn bixiyahaaga,tixgeli fursadaha kale ama tallo doono**. Soojeedi oo gal heshiiska deyntat(DA):** heshiiskadeynta waa balan sharci ahaan ku qabaneysa oo u dhaxeysa adiga iyo deyn bixiyaha ee ah inay aqbalaan badiba deyn bixiyahaaga.Heshiiska waa maamula mamulaha heshiiska deynta oo kugu dalici doona lacag ujraha ah.Deyntaada, hantidaada iyo dakhliga waa inay ka yar yihiin ilaa had*si aad u soo jeediso DA.Waxaad soo jeedin kartaa inaad lacagta u siiso deyn bixiyahaaga qayb qayb ama caddad wada socda oo ka yar caddadkii deyntaada. Waa lagaa fasaxayaa deynta ay dabooleyso heshiiska mar haddii aad dhammeystirtid dhammaan waajibaadka iyo lacag bixinada heshiiskaaga ku jira. Magacaaga.Magacaaga wuxuu ahaan doonaa diiwaanka dadweynaha (NPII)weligaa iyo diiwaanka deynta ganacsiyeedwakhti ilaa 5 sanno ah,am aka dheer xaaladaha qaarkood.Eeg qoraalka'Awoodaada aad ku heli karto deyn iyo adeegyada qaarkood waxaa laga yaabaa inay saameyso'bogaan xaggiisa hoose wixii macluumaad dheeraad ah iyo waajibaad.

**Soo jeedi oo gal heshiiska musalifnimada shakhsiyeed(PIA):** aPIA sidoo kale waa nidaam sharci ahaan ku qabanaya oo u dhaxeeya adiga iyo deyn bixiyahaaga oo ay tahay inay aqbalaan badiba deyn bixiyahaagu.PIAwaa inay maamulaan wakiilka oo lacag ujro ah kaa qaadaya.Ma jiraan wax xadad deyneed, hantyeed ama dakhli ah.Waxaad u soo jeedin kartaa deyn bixiyahaaga inaad qayb qayb u siiso deyn bixiyahaaga ama lacag wada socota oo laga yaabo inay ka yar tahay caddadka deyntaada oo dhan..waa laga deynayaa deynta uu heshiisku daboolayo mar haddii aad dhameyso dhammaan waalijaabka iyo lacag bixinta heshiiskaaga ku jira. Magacaagu wuxuu ku jiri doonaa diiwaanka dadweynaha (NPII) weligaa diiwaanka deynta ganacsiyeedna 5 sanno, am aka dheer xaaladaha qaarkood.

**Ilaha macluumaadka dheeraadka ah:** waxaadweydiisan kartaa caawimaad adeega la talinta lacagta, wakiilka diiwaangashan, maamulaha heshiiska deynta ee diiwaanka gashan, sharci yaqaan ama xisaabiye. Waxay kaala hadli doonaan wax ku saabsan fursadahaaga waxaana laga yaabaa inay la hadlaan deyn bixiyaha iyagoo ku metelaya.

Waxaad heli kartaa macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan fursadaha kore ama ilaha hagida lacageed adoo kala xiriiraya AFSA 1300 364 785 ama gelayawww.afsa.gov.au.

## Cawaaqibka siiwadida Codsiga Musalifnimada

**Wakil ayaa maamuli doona musalifnimadaada:**waxaalaga yaabaa inaad weydiisowakil diiwaangashan inuu maamulomusalifnimadaada.Haddii aadan dooran wakil,AFSA waxaa laga yaabaa inay weydiiso wakiilka diiwaangashan inuu noqdo wakiilkaaga, haddii kale, Wakiilka Rasmiga ah (AFSA) ayaa noqon doona wakiilkaaga.Deyn bixiyahaagu wuxuu bedeli karaa wakiilkaaga. Waa inaad caawisaa wakiilkaaga wakhti kasta. Waa inaad isla markiiba wargelisaa wakiilkaaga qoraal ahaan wixii isbedel ah ee xaaladaada shakhsiyeed ( oo uu ku jiro magic, cinwaanka ama dakhliga). Wakiilkaagu wuxuu kordhin karaa xiliga 3 sanno ee musalifnimada ilaa 5 ama 8 sanno xaaladaha qaarkood. Badanaa wakiilku wuxuu qaadan doonaa lacag ujro ah ee maamulida musalifnimadaada dhakhligaaga ama hantidaada ee ay helaan.

**Hantidaada waxaa laga yaabaa in la iibiyo:** waxaa laga yaabaainaad awoodo heysashada qalabka caadiga ah ee guriga**(** ilaa qiimo**)*** laakiinse hantida kale- oo uu gurigaagu ku jiro–waxaa iibin kara wakiilkaaga.Ma qarin kartid, ma qaadi kartid ama iibin karitid wax hanti ah oo Australia gudaheeda ama debedeeda ah. Haddii aad sidaa sameysid waxaa laga yaabaa in lagugu qaado dacwad demiyeed.

**Dakhligaaga, shaqada iyo ganacsiga waxaa laga yaabaa inuu saameeyo:** haddii dakhligaagu uu dhaafo ilaa had*,waxaa laga yaabaa in lagaa doonayo inaad sameyso inaad wax ka bixiso dakhligaaga. Ma noqon kartid agaasime iyo/ama maamuli kartid shirkad. Qaar ka mid ah haýadaha bixinta laysanka/aqoon yahanada qaarkood waxaa laga yaabaa inay xadidaan ama kaa hor istaagaan inaad sii wado ganacsigaas ama shaqadaas. Waxaa laga yaabaa inaadan awoodin qabashada qaar ka mid ah jagooyinka dawlada. Haddii aad ku jirtid ganacsi iyo mihnad leh magac ka duwan kaaga, waa inaad u sheegtaa qof kasta oo aad la macaamisho inaad kacday ama musaliftay. Haddii aadan sidaa yeelin, waxaa laga yaabaa in lagugu soo oogo dembi.

**Waxaa laga yaabaa inaanan lagaa deynin dhammaan deymaha:** waa lagaa daayey badiba deymaha aan dammaanada lahayn(tusaale, credit cards, deymaha shakhsiyeed, kaararka bakhaarka)mar haddii lagaa daayo musalifnimadaada. Noocyada deymaha qaarkood ma daboolayaan musalifnimada(tusaale, deyntaad ku gashay wax isbada marin, ganaaxyo/ciqaabid iyo deymaha taageerida ilmaha) iyo waa inaad sii wadaa bixinta deymahaas. Haddii deynta dammaanad ay u ahayd hanti ( tusaale, guri deyn ah ama gaari) oo aadan ilaalin lacag bixinta, deyn bixiyahaas dib ayuu u yeelan karaa hantida oo uu u iibin karaa , si kastaba ha ahaatee farqiga , haddii ay wax jiraan waxaa dabooli doona musalifnimada.

**Awoodaada aad dibeda ugu safreysid way saameyn doontaa:** ma awoodi doontidinaad dibeda u safartid adoon ka helin ogolaansho qoraal ah wakiilkaaga waxaana laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad baasaboorkaaga u dhiibto wakiilkaaga. Haddii musalifnimadaada ay maamusho Wakiil Rasmi ah, waxaa lagaaga baahan doonaa inaad bixiso lacagta codsiga safarka dibeda.

**Magacaagu wuxuu ku jiri doonaa diiwaanka dadweynaha (NPII)weligaa:** waxaa sidii kale lagu diiwaangelinayaa diiwaanka deynta ganacsiga ilaa 5 sanno, ama ka dheer xaaladaha qaarkood.

**Awoodaada aad ku helayso deyn iyo adeegyo kale waxaa laga yaabaa inay saameyso:** waxaa laga yaabaa inay kugu adkaato inaad lacag deymato iyo inaad waxyaalo ku iibsato deyn. Waxaa laga yaabaa inay kugu adkaato inaad wax kireysato, aad hesho korontada, biayaha ama taleefanka laguu soo xiro adoon bixin debaaji. Bangiyada qaarkood waxaa laga yaabaa inaysan kuu ogolaan inaadan yeelan xisaab ama waxaa laga yaabaa inay xaddidaan sidii aad u isticmaali lahayd xisaabtaada. Haddii aad qaadato deyn ah $3000 ama ka badan* ka dib waa inaad u sheegtaa deyn bixiyaha inaad musalif tahay. Haddii aad gasho heshiiska kiro iibsiga ama heshiiska kireysiga ama kireynta wixii alaab ah halkaas oo ay caddadka ama wadarta $3000 ama wax ka badan * ka dib waa inaad u sheegtaa iibiyaha ama hantida cida leh inaad musalif tahay. Haddii aad hesho adeegyo iyo alaab adoo siinaya biilka sarifka, jeeg ama warqad balan qaad ah halkaas oo caddadku yahay $3000 ama ka badan* waa inaad u sheegto alaabta cidda keentay ama adeegyada inaad tahay musalif. Haddii aad hesho lacag ama lacag bixin ah $3000 ama ka badan* adoo balan qaadaya inaad alaabo keenayso ama adeeg qabaneysid, waa inaad u sheegtaa qofka wax iibsanaya inaad musalif tahay. Haddii aadan u sheegin musalifnimadaada xaaladahaan, waxaa laga yaabaa in lagugu soo oogo dacwad dembi ah.

*Tani waa caddad la kordhin karo sidaa daraadeed wuxuu u kordhaa xili xili (eeg s304Aee Xeerka Musalifnimada).Wixii ah xadadka hadda jira iyo caddadyada lacagta eeg caddadyada la kordhiyey am aka wac AFSA1300 364 785 wixii nuqul ah.

## IAcknowledgethatIhaveReceivedandReadthePrescribedInformation

Saxiixaaga

Taariikhda (MM/BB/SSSS)